# Ka Qaybgalka Dhallinta iyo Heshiiska Oggolaanshaha Waalidka 2018

Dhammaan dhalinyarada kayar 18 waqtiga codsigan la gudbiyay waa inay ka haystaan oggolaansho waalid/mas 'uul inay ka qaybgalaan STEP-UP. Waalidka/mas'uulku waa in inuu akhriyo oo buuxiyo dhammaan qaybaha ka midka ah ee bogga.
Haddii aad tahay 18 jir ama aad ka weyn tahay hadda, waa inaad buuxisaa qaybtan.

**DHAMMAAN MEELAHA BAANNAAN WAA IN LA BUUXIYAA**

Magaca Qofka Dhallinta ah (Codsadaha):___________________________ Taleefan:___________________________

Lambar Sooshal Sekuriti: ________________________________________ Taariikhda Dhalashada: _____________

Haddii aan la ii xullan STEP-UP, waxaan u siin doonaa fasax STEP-UP si ay ugu siideyso macluumaadkayga xiriirka bixiyayaasha kale ee shaqada dhalinyarada. ☐ Haa ☐ Maya

Magaca Waalid/Mas'uul_______________________________________________Taleefan:___________________

Magaca Lala Xiriirayo Xaaladda Degdegga ah:______________________________Taleefan:___________________

Dhallinta STEP-UP ayaa ka qaybqaata tababbaritaan fasal, kulanka qaadashada, iyo wareysi leyli ah kahor inteyna galin kooxda codsade ee lagu aaddinayo shaqada. Waa himiladayada si aan u caawino mid kasta oo ka mid ah dhalinyaradu inay ka faa'iideystaan intii suurtagal ah tallaabo kasta oo habsocodka ka mid ah. Ilmahaagu miyuu u baahan doonaa caawimaad ama taageero gaar ah inta lagu jiro STEP-UP? Haddii ay haa tahay, fadlan sifayn ka bixi nooca caawimada ah ama taageero ay u baahan doonaan si ay si fiican ay ugu faa'iideystaan aqoonta oo ay u guuleystaan.

_____________________________________________________________________________________________

_____________________________________________________________________________________________

## Bayaanka Fasaxa Waalidka

- Waxaan halkan ku siinayaa oggolaansho ka qaybgalaha STEP-UP, aniga laftayda ama ilmahayga ha noqotee, inuu ka qaybgalo barnaamijka tababbaritaanka STEP-UP ee shaqaduna suurtagal tahay.
- Waxaan fahansanahay in ka qaybgalayaasha ay dhici karto in loo gudbiyo shaqaalaynta hay'adaha kala duwan ee aan ka soo jeedin magaalada ama loo-shaqeeyeyaasha.
- In kasta oo gaadiidka dadweynaha laga yaabo in la siiyo, waxaan fahamsanahay inayna magaalada Minneapolis iyo AchieveMpls kormeerayn dhalinyarada ka qaybgalayaasha ah wakhtiyadaas.
- Aniga ayaa si ikhtiyaar ah ugu sii deynaya Magaalada Minneapolis, AchieveMpls, Minneapolis Workforce Centers, Project for Pride in Living iyo Minneapolis Park and Recreation Board wax kasta iyo dhammaan xil-saarnida salka ku haysa u sheegashada daayaaca mararka u ka qaybgaluhu uuna hoos iman kormeerka qolooyinka korka lagu soo qaaday.
- Anigu waxaan aqbalayaa inaan siiyo, wixii kasta ah caddayn loogu baahdo xaqiijinta macluumaadka ku saabsan codsiga ka qaybgalaha STEP-UP , ka qaybgalka aniga laftayda ama ilmahayga ha noqotee, oo waxaan u oggolahay Magaalada Minneapolis iyo AchieveMpls ama bixiyeyaashooda si ay u xaqiijiyaan macluumaadka la bixiyay, haddii loo baahdo.
- Anigu waxaan fasax u siinayaa Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis (MPS) ama hay’adda kale waxbarasho inay u siidaayaan diiwaannada tacliinta, dhibcaha imtixaanka iyo macluumaadka kale ee ka qaybqaataha STEP-UP, kuwayga ama kuwa ilmahaygaba ha noqdaan, Magaalada Minneapolis, AchieveMpls, qandaraaslahooda, cilmi-baarayaashooda iyo kuwa ay iskaashiga la leeyihiin kolba sida loogu baahdo ka qaybgalka STEP-UP iyo ujeeddooyinka cilmi-baarsita oo ay ku jiraan diiwaannada tacliinta dhammaan muddada ka qayb-qaadashada ka qaybgalayaasha STEP-UP.
- Waxaan ogolaadey, awoodna aan usiiyey dhamaan meelihii aan kasoo shaqeeyey in ay akhbaarteyda la wadaagi karaan AchieveMpls, City of Minneapolis and Department of Employment and Economic Development akhbaartaas oo ku saabsanaankarta khibradeyda shaqo, talooyinka madaxdu siiso shaqaalaha, talaabooyin anshaxmarin ah, iyo hadii ay jirto sabab shaqo ka cayrin.
- Waxaan u siinayaa oggolaansho Barnaamijka STEP-UP inay u siidayso macluumaadka Ka-qaybqaataha iyo xogta barnaamijka qolooyinka u shaqeeya ardayda STEP-UP loogu talagalay ujeeddooyinka iskaashiga, cilmibaarista iyo/ama fuundaynta.
- Anigu waxaan aqbalayaa in ka qaybgalayaasha STEP-UP ayna sheegan doonin xaqooda magdhowga shaqao-la'aanta ka timaad shaqo joojin ama dhacdo kale.
- Waxaan aqbalayaa in ka qaybqaataha STEP-UP, aniga ama ilmahayga , ay dhici karto in la wareysto, la sawiro iyo/ama ina laga duubo fiidiyo si loo xayaysiiyo STEP-UP, loo-shaqeeyihiisa/eeda, Magaalada Minneapolis qandaraaslayaasheeda, laakin aan ku ekayn AchieveMpls, Project for Pride in Living iyo Minneapolis Park Board iyo Minnesota Department of Employment and Economic Development (Waaxda Shaqaaleynta iyo Horumarinta Dhaqaalaha Minnesota).
- Anigu waxaan oggolahay in ka qaybgalaha STEP-UP, aniga laftayda ama ilmahayga ha noqote, laga yaabo inay ka qayb-qaataan qiimaynta barnaamijka.
- Waxaan U ogalaadey Magaalada Minneapolis iyo Achieve-Minneapolis in ay Akhbaartayda la xariirta Barnaamijka STEP-UP la wadaagi karaan hay’adaha ay xiriirka wada shaqayn leeyihiin.
- Waxaan ka warqabaa in hadii uu Cunugeygu ka qaybqaato, ama uu dhameystirto Barnaamijkaan uu ka heli karo (high school credit) Saacado u buuxiya Saacadaha Dugsiga saree ee Iskuulada Project for Pride in Living, Intermediate School District 916, iyo kuwa kale ee iskaashigu nagala dhexeeyo.

Aniga oo saxeexa hoosta, ayaan caddaynayaa inaan akhriyay, fahmay, oo aan ku raacayo macluumaadka iyo kelmadaha ka jira codsigan. Digniin: 18 U.S.C. Qodobka 1001 ee Xeerarka Minnesota Statutes, Qodobka 15C.02 - -Xatooyada iyo Kelmadaha Beenta ah, ayaa ka dhigayasa dembi sharci-darro in loo dhiibo qawl been ah ama la isku been-farriimo waaxyada ama hay'ad Maraykan oo ka dhacay meelaha ay xukunto Gobolaka Minnesota iyo Magaaladuba.

**Saxeexa Qofka Dhallinta ah:** ______________________________ **Taariikh:** ___________

*(Loo baahanyahay)*

**Saxeexa Waalidka**__________________________________________ **Taariikh:** ___________

*(Looga baahanyahay dhallinta ka yar 18)*

WAA INAAD KEENTAA FOOMKAN FASAXA EE LA BUUXIYAY, LANA SAXEEXAY MAALINTA UGU HORREYSA EE TABABBARKA.

FOOMKAN LA BUUXIYAY EE LA SAXEEXAY AYAA AH "TIGIDHKAAGA AAD KU HELEYSO TABABBARINTAAN"